

٩ ربيع الأول ١٤٤٣ هـ

جمهورية مصر العربية

١٥ أكتوبر ٢٠٢١ م

وزارة الأوقاف

## Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) oo lagaga daydo gurigiisa iyo noloshiisa

Mahad Allaa iska leh , Allaha Caalamka oo Qur'aanka Kariimka ku yiri:

{لَقَدْ جَاءَكُمْ رَسُولٌ مِّنْ أَنْفُسِكُمْ عَزِيزٌ عَلَيْهِ مَا عَنِتُّمْ حَرِيصٌ عَلَيْكُمْ بِالْمُؤْمِنِينَ رَءُوفٌ رَّحِيمٌ،}

{ waxaa idiin yimid Rasuul idinka mida oyna ku darantahay waxa idin dhiba, idiin kuna dadaali, una turid iyo naxariis badan Mu'miniinta. } waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame, intaas kaddib.

Alle ( Cazza wa jalla ) Nebiga ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu ka doortay khalqiga oo dhan, wuxuu u sharxay laabtiisa, arrinkiisana kor ayuu u qaaday, xuskiisana wuu sarraysiiyay, wuxuu ku mannaystay dhammaan sifooyinka kaamilnimada aadanaha, wuxuu ahaa ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) midka ugu dhammaystiran dadka dabeecad ahaan, iyo wanaagga nafta, iyo dahaarada qalbiga Iyo kuwa ugu wanaagsan xagga fikirka, uguna wanaagsan xagga dhaqanka, sida uu Eebbe weyne yiri :

{وَإِنَّكَ لَعَلَىٰ خُلُقٍ عَظِيمٍ.}

{ Waxaana kuu sugnaaday dabeeco (fiican) oo weyn }.

Qof kasta fiirfiiriya nolosha Nabigeenna ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee ) wuxuu ogaanayaa inuu dhab ahaantii ku dayasho u yahay dhammaan bani -aadamka, halkaas oo uu ka leeyahay Alle ( cazza wa jalla ):

{لَقَدْ كَانَ لَكُمْ فِي رَسُولِ اللَّهِ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ لِمَن كَانَ يَرْجُو اللَّهَ وَالْيَوْمَ الْآخِرَ وَذَكَرَ

اللَّهُ كَثِيرًا}

{ waxaa idiinku sugan Rasuulka Eebe Kudayasho wanaagsan, ruuxii rajayn Eebe iyo Maalinta Aakhiro, Eebana xusa in Badan. } ,waxaad arkaysaa ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) inuu ahaa sayga ugu fiican, iyo aabbaha ugu fiican, iyo awoowga ugu fiican, siiba marka uu leeyahay

(خَيْرُكُمْ خَيْرُكُمْ لِأَهْلِهِ، وَأَنَا خَيْرُكُمْ لِأَهْلِي).

( kan idiinku khayr badan ayaa ugu wanaagsan ehelkiisa, aniguna waxaan idiin ahay kan idiinku fiican qoyskayga ).

Maxaa ka fiican inaad dul istaagno qeyb ka mid ah akhlaaqdiisa (nabadgalyo korkiisa ha ahaato ) xagga guriga, iyo dhaqanka wanaagsan uu kula dhaqmi jiray Ehelkiisa, waa tanaa xaaskiisa Marwo Khadiija (Alle raalli haka noqdee ) oo ku tilmaamayso ( nabadgalyo korkiisa ha ahaato ) iyadoo leh :

"إِنَّكَ لَتَصِلُ الرَّحِيمَ، وَتَحْمِلُ الْكَلَّ، وَتَكْسِبُ الْمَعْدُومَ، وَتَقْرِي الضَّيْفَ، وَتُعِينُ عَلَى نَوَائِبِ الْحَقِّ"

" Waxaad xiriirisaa qarabada qofka taagta yarna waad xambaartaa wixii la la'yahayna waad kasbataa martidana waad soortaa waxaad uga gargaartaa musiibooyinka dhabta ah" waa kanaa naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) oo ilaalinaya iyada ballanta

dhimashadeedii kadib; waxaa ka mid ah in haweeney waayeel ah ay soo booqanaysay ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuu u istaagi jiray wuu sharfi jiray markay weydiisay marwo caa'isho sirta ku jirta karaamayntiisa uu haweeynaydaas karaamaynayo wuxuu yiri:

(إِنَّهَا كَانَتْ تَأْتِينَا عَلَى عَهْدِ خَدِيجَةَ، وَإِنَّ حُسْنَ الْعَهْدِ مِنَ الْإِيمَانِ)،

**(waxay noo imaan jirtay waqtigii khadiija ballanta wanaagsanna iimaanka ayay ka mid tahay) wuxuu ka sheegi jiray (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) mu'miniinta hooyadooda Khadiija (Alle raalli haka noqdee) uu oran jiray :**

(مَا أَبْدَلَنِي اللَّهُ عَزَّ وَجَلَّ خَيْرًا مِنْهَا، قَدْ آمَنْتُ بِي إِذْ كَفَرَبِي النَّاسُ، وَصَدَّقْتَنِي إِذْ كَذَّبَنِي النَّاسُ، وَوَأَسْتَنِي بِمَالِهَا إِذْ حَرَمَنِي النَّاسُ، وَرَزَقَنِي اللَّهُ عَزَّ وَجَلَّ وَلَدَهَا).

**(Ilaahay iiguma badalin wax iyada ka khayr badan waxay i aamintay markay dadka igu kufriyeen, waxay i rumaysay dadka markay i beeniyeen, maalkeeda ayay i siisay markay dadka ii diideen, Alle ilmo ayuu iga siiyay)**

Sidoo kale ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu caawin jiray reerkiisu wuxuu ka caawin jiray baahidooda, halkaas oo ay ka leedahay Marwo Caa'isha ( Alle ha ka raalli noqdee ):

كان (صلى الله عليه وسلم): يخيظ ثوبه، ويخصف نعله، ويعمل ما يعمل الرجال في بيوتهم،

isaga wuxuu ahaa ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee): mid tola dharkiisa, oona hagaajiya kabtiisa, wuxuu ka sameyn jiray gurigiisa wixii raggu guryahooda ay ka sameeyaan, waxaa la weydiiyay Marwo Caa'isha

( Alle ha ka raalli noqdee ): Muxuu Nabigu ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee ) gurigiisa ka qaban jiray? Waxay tiri :

كان يكون في مهنة أهله، فإذا حضرت الصلاة يتوضأ ويخرج إلى الصلاة،

Wuxuu ahaan jiray qof u shaqeeya reerkiisa, markii salaadda la gaaro ayuu soo weysaysan jiray oo u soo bixi jiray salaadda, taa beddelkeeda Nabigeenna ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee ) wuxuu aad u jeclaa inuu farxadgaliyo dadka gurigiisa isagoo waqti u qoondeeyey, taasna waxaa ka mid ah markii habeenku la gaaro Marwo Caa'isha ( Ilaahay raalli haka noqdee ), ayuu la socon jiray marmar wuu la sheekaysan jiray .

Waxay ku lahaayeen gabdhihiisa ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) qayb weyn oo ka mid ah wanaagiisa iyo karaamadiisa, waxay ahayd gabadhiisa Marwo Faadumo ( Alle raalli ka noqdee ) , haddii ay usoo gasho wuu u istaagi jiray gacanta ayuu ka qaban jiray oo dhunkan jiray wuxuu fariisin jiray booskiisa, wuxuu ahaa marka ay usoo gasho mid u istaagto oo gacantiisa qabato oo dhunkato oo booskeeda fariisiso, Faatima ayaa timid iyadoo socodkeeda uusan ka leexanaynin socodka nabiga markuu arkay wuu soo dhoweeyay wuxuu yiri ( **soo dhowoow gabadhaydiyay**) kaddib dhiniciisa ayuu fariisiiyay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)

\*\*\*

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay nebiyada iyo rasuullada, sayidkeenna Muxammad ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) , iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa .

Nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu ahaa awoowga ugu fiican ilmihisa wuu karaamayn jiray wuu u dhimrin jiray waxaa ka mid ah taas wuxuu arkay asoo khudbaynaya Xasan iyo Xuseen oo usoo socda labo qamiis guduudan xiran oo ay kufayaan oo kacayaan wuu usoo degay wuu ku duubsamay minbarka ayuu u qaaday, wuxuu arkay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) sayidkeena Xuseen (Alle raalli haka noqdee) asoo la ciyaarayo ilmo oo waddada jooga wuxuu u fidiyay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) gacmihisa Xuseen wuxuu bilaabay inuu ka cararo halkaan ayuu u cararaa hadana halkan ayuu u cararaa nabigana wuu la qoslayay ilaa uu ka qaado oo uu dhunkado wuxuu yiri:

(حُسَيْنٌ مِنِّي، وَأَنَا مِنْ حُسَيْنٍ، أَحَبَّ اللَّهُ مِنْ أَحَبِّ حُسَيْنًا).

(Xuseen wuu iga mid yahay anigana Xuseen ayaan ka mid ahay Alle ha jeclaado qofkii Xuseen jeclaado)

Isaga ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) maalin buu salaadda dadka dujinayay, markaas ayay u timid gabadh uu awoowe u yahay oo la dhaho Umaama ( Alle raalli ka noqdee ) . waa xambaari jiray marka uu taagan yahay, dhulkana wuu dhigi jiray marka uu sujuudsan yahay, sidoo kale ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu ula ciyaari jiray Saynab oo ahayd gabadhii xaaskiisa, Ummu Salama ( Alle raalli ka noqdee), wuxuuna oran jiray : Saynabey, Saynab yareey, marar badan ) .

Haddaba maxaa inooga baahi badan inaan Nabigeenna ( naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee ) ku dayanno dhammaan arrimaha noloshiisa, waayo isaga ( nabadgalyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee ) waa kan dadka ugu naxariis badan uguna deeqsi badan uguna run badan uguna cadaalad badan uguna geesisan, kudayashadaasna waxay daliil u tahay jacaylkiisa wuxuu leeyahay Alle:

قُلْ إِنْ كُنْتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحِبُّكُمْ اللَّهُ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ.

**(Waxaad dhahdaa haddaad tihii kuwo jecel Eebe i raaca haydin jeelaado Eebee hana idiin dhaafu dambigiinee, Eebana waa dambi dhaafe Naxariista.)**

**Allow nagu arsaaq kudaaysho wanaagsan aan ku dayanayno nabiga  
(naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)**